



Ogeysiiska Shaqaalaha ku socda

Waa sharcig! Shaqaaleysiiyayaashu waa inay ogeysiiskan ku dhejiyaan meel shaqaaluhu ka akhrin karaan.

(Xeerka Washington oo la Naqtiimay 51.14.100) (Revised Code of Washington 51.14.100)

Haddii dhaawac shaqada kaa soo gaaro

Loo shaqeeyuhu caymis u gaar ah ayuu leeyahay. Xaq baad u leedahay dhammaan dheefaha ay waajibiyeen shuruucda magdhowga shaqaalaha ee gobolka Washington (caymiska warshadaha). Dheefaha waxa ka mid ah daawayn caafimaad iyo mushqaayad beddelis haddii aad shaqada seegto. Waaxda Shaqaalaha iyo Warshadaha (Department of Labor & Industries, L&I) ayaa xukuma shuruucdan.

Maxay tahay inaad sameyso

Soo gudbi dhaawacaaga Haddii aad dhaawacanto, adigoo aan u eegayn in dhaawacu yar yahay iyo in kale, la xiriir qofka ku qoran boostarkan.

Daryeel caafimaad raadso. Daawayntaada koobaad, booqo wixii bixiye daryeel caafimaad ah ee ku habboon daawaynta dhaawacaaga. Wixii daryeel caafimaad oo joogto ah, la kulan dhakhtar ku jira shabakadda L&I. (Bixiyayaasha shabakadda ku jira ka eeg Lni.wa.gov/FindADoc.) (Linkiyada ku jira daabacaddan waxay ku qoran yihiin keliya luuqadda Ingiriisida.)

Bixiyayaasha daryeelka caafimaadka ee u qalma waxa ka mid ah: dhakhaatiirta, dhakhaatiirta daawaynta iswata, dhakhaatiirta duugista murqaha iyo lafaha, dhakhaatiirta daawo-dhaqameedka, iyo dhakhaatiirta addimaha iyo curuqaha, dhakhaatiirta ilkaha, dhakhaatiirta indhaha, dhakhaatiirta cudurada indhaha; kaaliyayaasha dhakhaatiirta, iyo kalkaalisoooyinka diiwaangashan ee xirfadlayaasha ah, iyo sheegooyinka si gaar ah loogu xaaladaha daryeelka caafimaadka, dhakhaatiirta cilmi-nafsiga.

Sheegashadaada u soo gudbi sida ugu dhakhsaha badan ee suurtagalka ah. Dhaawaca shaqada kugu gaara, waa inaad dacwadada sheegashada shaqaaleysiiyahaaga ugu soo gudbiso hal sano gudahood ka dib maalinta dhaawacu dhacay. Wixii xanuun shaqada ka dhashay ah, waa inaad sheegashadaada ku soo gudbiso laba sannadood gudahood ka dib taariikhda bixiye daryeel caafimaad qoraal ahaan kuu sheego in xanuunkaagu shaqada la xiriiro.

La xiriir U-doodaha Xuquuqaha Shaqaalaha Is-caymiya ee Dhaawacan ee 1-888-317-0493 si lagaaga caawiyo arrimaha magdhowga shaqaalaha.

Si aad u soo gudbiso dhaawac:

Haddii aad ku dhaawacanto shaqada ama aad yeelato xanuun shaqada ka dhashay, isla markiiba tan u soo gudbi dadka hoose:

Magaca: _____

Telefoonka: _____

limaylka: _____

Markii la codsado, taageero luuqadeed iyo habab xog-gudbineed loogu talagalay dadka naafada ah ayaa diyaar ah. Wac 1-800-547-8367. Isticmaalayaasha Qalabka Isgaadhsiinta ee Dhagoolayaasha (Telecommunication Device for the Deaf, TDD), waca 711. L&I waa loo shaqeeye fursadooda loo siman yahay.

Boorarka goobta shaqada ee loo baahan yahay

Booqo Lni.wa.gov/RequiredPosters

si aad wax badan uga ogaato waraaqaha goobta shaqada ee L&I iyo hay'ada ee dawlada kale.

Self-Insurance Section
Department of Labor & Industries
PO Box 44890
Olympia WA 98504-4890